

## Soo Sheegista Waxyeelaynta Ilmaha Jooga Vermont

Haddii aad ka shakadin in ilmo la waxyeeleeyo ama la dayacay, fadlan wac 1-800-649-5285 si aad usoo sheegto —24ka saac ee maalintii, 7da bari ee asbuucii.

Laynka 24ka saac ee Ilaalinta Ilmaha wuxuu kuu sahlayaa inaad waxyaalaha aad walwalka ka qabto xogtooda la wadaagto shaqaale bulsho oo tababaran.

*Haddii uu ilmuhu ku jiro khatar dagdag ah, marka hore waxaad wacdaa 911 ee booliska deegaankaaga. Kadibna anaga nasoo wac si aad noogu warbixiso.*

---

### Yaa soo warbixin kara?

Waxaan ku dhiiragalinaynaa dhamaan dadka reer Vermont inay soo wacaan Laynka Ilaalinta Ilmaha si ay usoo sheegaan wixii walwal ah ee ay ka qabaan badqabka ilmo caruur ah. Dadka qaarkii, oo la dhaho, *warbixiyayaal la ogalaaday*, shirci ahaan ayaa looga rabaa inay soo sheegaan wixii waxyeello ilmo ah ee ay ka shakiyaan oo ay kusoo sheegaan 24 saac gudahood.

**TIP:** Ka hor inta aadan wicitaan samayn, isku day inaad gacanta ku hayso warbixinta ugu badan ee ugu macquulsan (tusaale magaca ilmaah, taariikhda dhalashada, ciwaanka guriga, iskuulka, ama bixiyaha daryeelka caruurta , iyo magacyada waalidka).

---

**Ilaalinta ilamaha waa shaqada qof kasta. Wicitaankaagu wuxuu ilaalin karaa ilmo, waxaad ku caawin kartaa qoys, waxaana laga yaabaa xitaa inay badbaadiso ilmohild protection is everyone's business. Your call could protect a child, get help for a family, and even save a child's life!**

---

### Warbixiyayaasha La Ogalaaday ee Vermont

Haddii aad ka shaqayso mid un ka mid ah xirfadaha soo socda, waxaad tahay *warbixiye la ogalyahay* waxaana sharci ahaan lagaaga rabaa inaad soo sheegto wixii waxyeelayn ama dayac ilmeed ah waana inaad kusoo sheegtaa 24 saac gudahood.

- Dhakhtarka lafaha, dhakhtarka ilkhaha, dadka ka shaqeeya xaaladaha caafimaad ee dagdagga ah, kalkaaliso sharciyaysan, caafimaad baadhe, khabiir xanuunada maskaxd qaabilsan, Dhakhtarka qalfoofka, farmashiiste, dhakhtar, caawiye dhakhtar, saykoolajiiste, kalkaaliso diiwaangashan, dhakhtar wax qala, ama bixiye adeeg caafimaad oo kale;
- Maamule isbitaal, tababar qaate, ama dhakhtar deegaan oo isbitaal kasta oo ku yaalla gobalka;

- Horjoogayaasha iskuulka, maamule, madax fasal, macalin, qofka maktabadda haye, hagaha talada bixiya, ama qof kale oo si joogta ama heshiis kula jira isagoo lacag kaga helay iskool dagmo ama iskuul madax banaan si loo bixiyo adeegyo arday;
- Qaabilsane caruur, sargaal boolis, sargaal xarun dhaqan celin, shaqaale bulsho, ama xubin kaleerji ah;
- Maamule xero deegaan ama xero aan deegaan ahayn, talabixiye, ama mulkiile; iyo
- Shaqale, qandaraasle, ama Wakiil Ajansi Adeeg Aadane kaasoo xiriir la leh macaamiisha.

Halkan ku dhufo haddii aad tahay warbixiye la ogalyahay.